Gästrike återvinnare

# Salaan!

## Si diiran ugu soo dhowaaw gurigaaga cusub !

Si aan si wadajir ah u abuurno deegaan waara, waxaan dooneynaa in aan ku siino warbixin gaaban oo ku saabsan sida uu qashin-kala sooca xaafaddu u shaqeeyo. Kolka aad si sax ah u kala soocdo qashinka waxaad nagu caawineysaa in aan hantida la wada leeyahay si caqli ku dhisan gacanta ugu qabano. Ka dibna aan deegaanka aan deganahay ka dhigno mid aan dhamaanteen ka helno oo inoo wanaagsan.

## Sidaan ayaad baakadaha u kala sooci kartaa

**Meel gurigaaga u dhow waxaa yaal haan lagu rido qashinka cuntada- iyo midka haraaga ah, iyo weliba meel lagu rido baakadaha ka samaysan waraaqaha, caagaga, qarshadaha iyo biraha.**



**Si kala sooca** qashinku ugu shaqeeyo si wanaagsan,waxaa muhiim ah in qashinka lagu kala rido haamaha ay kala leeyihiin, sida haanta qashinka baakadaha iyo waraaqaha, caagaga, birta iyo qarshadaha.

**Baakad waa walax** ujeedada ugu weyni tahay in shey kale lagu meeleeyo si ay u difaacdo ama lagu safriyo.

**Tusaale,baakaduhu waa** kartoonka caanaha,caagaga ay ku jiraan dareeraha alaabta lagu dhaqo,qasacadaha raashinka. Waxyaalaha sida buraashka alaabta lagu dhaqo,warqada wax lagu dubbo, buraashka ilkaha lagu cadaysto maaha baakado, sidaa darteed waxaa lagu ridayaa haanta qashinka haraaga ah.




**Si haanta qashinka** baakaduhu u yeelato mug ay wax ku qaado waa in baakadaha la fidiyaa , kuwa yaryarna la dhexgeliyaa kuwa waaweyn. Si taas la mid ah ku samee baakadaha ka samaysan caagga- Kolkaas waxaad yareyneysaa khatarta in qaybo yaryar oo caagag ah ay dabayshu qaado marka qashinka laga shubaayo haanta ee la qaadaayo.




För en värld
som räcker längre

Box 722, 801 28 Gävle
Utmarksvägen 16
Tel 020-63 00 63
info@gastrikeatervinnare.se



Gästrike återvinnare

## Sidaan ayaa loo kala soocayaa qashinka cuntada



**Qashinka ka yimaada** cuntada aad isticmaashaan waxaa lagu ridayaa bac ka samaysan warqad oo midabkeedu bunni yahay, taasoo si gaar ah ugu haboon wersheda soo saarta gaaska dabiiciga ah. Maadaama aan qashinka cuntada ka samayno gaaska dabiiciga ah waxaa muhiim ah in aan la isticmaalin baco ka samaysan caag ah oo aan la burburin karin. Bacaha ka samaysan warqada waxaa laga helaa meelo badan oo dukaamada cuntada ah, ama meesha alaabta qashinka la dhigo ee gurigu leeyahay. Si ay biyaha uga daataan bacda qashinka ee warqada ka samaysan, isticmaal haan qashin ee hawadu dhexmari karto, bacda qashinka bedel marar badan, buuxi afarmeelood saddex ¾, ka ilaali in bacdu qoydo oo kala jabto.









**Ma haysatid miyaa** qashin celiye? Waxaa lacag laàan looga soo qaadan karaa meelaha qashinka lagu ururiyo oo dib loogu habeeyo ( återvinningscentraler). Waxaad kaloo la xiriiri kartaa hayàda guryaha si ay kuu caawiyaan.

**Waxaan halkaan kuugu** soo lifaaqnay warqad-warbixineed aad ka heli kartid macluumaad ku saabsan sida lagu heli karo habka ugu wanaagsan ee qashinka lagu kala sooci karo. Waxaad kaloo warbixin dheeraad ah ka heli kartaa hoyga gastrikeatervinnare.se.

**Si wadajir ah,** suurtagalna ah ayaan isu caawineynaa , si waxyaalaha qashinka ah aan dib uga samayno alaabo cusub. Waad ku mahadsan tahay inaad hawshaan qayb ka tahay oo aad gacan ka geysatay.Shaqadaadu waa mid qiimo leh!

Salaan wanaagsan Gästrike återvinnare




För en värld
som räcker längre

Box 722, 801 28 Gävle
Utmarksvägen 16
Tel 020-63 00 63
info@gastrikeatervinnare.se

